Seljord kommune

Lama ogala in la shaaciiyo jf:

Sharciga ka hadlaaya shaacin arimaha maamulka §13
Sharciga adeega bulshada § 8-8

HUSLEIGEKONTRAKT FOR KOMMUNALE BUSTADAR
HESHIIS- IJAARKA EE GURYAHA DEGMADA

Utleigar: **Seljord kommune**
Kireeye:

Leigetakar: _____
Kireyste

_____

1. Waxaa la siiyay guri degmo

☐ Guriga waxaa lagu siiyay markii ”la raacay xeerka lagu qaybiyo guryaha degmada kaas oo eegahay sharciga guryaha ay degmada Seljord ugu talo gashay” § 11, kiiska: _____

☐ Guriga waxaa lagu siisyay sabab kale:

_____

_____

2. Ijaarku waxa uu quseeyaa

Ciwaanka guriga: _____ Waxaa ku jira qaytan dibada ah.

Bedka (Areal) _____ m² qolalka la joogo: _____ qolalka jiifka ah: _____ Garaash: _____

Koronto cabbire nr. _____ Tariikhdii la cabiray . _____ Cabbiraad: _____

3. Qiimaha ijaarka

Bishiiba ijaaro hada waa kr. _____ Waxaana la bixinayaa tariikhda. 20. Bil kasta waxaa lagu diryaa: Seljord Kommune, Brøløsvegen 13 A, 3840 Seljord, Xisaabta (konto); 2711 07 10777

☐ balanta bankiga laga jarto (avtalegiro) ☐ in laguu soo diro ☐ in mushaarkaga ama waxa lagu siiyo toos looga jaro.

Degmada waxay bedeshaa lacagta ijaarka sanadkasta 1.march taas lo eegaayo qiimaha kordha (konsumprisindeksen) markay tariikdu tahay 15.desember sannadka ka horeeyay.

Lacagta ijaarku waxa ku jira kirada guriga, cashuurta degmada ee biyahay, bulaacada, Qashinka iyo nadiifinta qalabka qiiqa qaada (feiing) iyo caymiska dabka ee guriga. Qofka kiraystaha waxa uu bixinayaa kharashka korantada, caymiska alaabta guriga taala iyo hagaajinta caadigaa (jfr. Xeerka ijaarka § 5-3).

Hadii la soo dego inta ka horeysa 15. Bisha waxaa bixinasaa ijaarka bisha oo dhan. Hadii aad soo degto inta ka danbeyso 15. Bisha waxaa bixinasaa bisha kala badhkeed. Hadii aad guurto inta ka horeysa 15.bisha waxaa bixinasaa bil kale badhkeed, hadii aad guurto inta ka danbayse 15.bisha waxaa bixinasaa bisha oo dhan.

4. Dabaaji

☐ Si loo eego ilaalinta dhismaha guriga ee qofka kiraystay masuul ka yahay, waxaa la qaada dabaaji, waana in uu kiraystahu bixiyaa inta aanu guurin lacag dhan 3 jibaar lacagtii ijaarka guriga kr. _____.
Dabaajiga waxaa lagu shubaaya xisaab (Konto) ku taala Seljord Sparebank. Ribada ku korada waxaa leh qof kireysa guriga.
☐ NAV Seljord ayaa keentay damiin (garanti) qooraal ah . Kiis:
☐ Adeega qaxootiga (Flyktningetenesta) ayaa keenay damiin (garanti) qooraal ah, kaas oo u dhigma lacagta dabaaji. Kiis:
☐ Kiraystuhu ma bixinaayo dabaaji.

5. Waqtiga ijaarka

Heshiiska-ijaar waa mid mudaysan jf. Dareeqa sharciga § 12.
Heshiisku waxa uuyahay laga bilaabo wakhtiga _____ iyo ilaa wakhtigan _____.
Hadii ay degmadu u baahato guryo isku bedel, waa in uu kiraystuhu ogalaado in guri kale loo raro.
Heshiiska-ijaarka gurigu waxa uu dhamaanayaa marka wakhtigu dhamaado, ama la soo diro waraaq guriga looga baxaa iyada la raacayo sharciga ijaarka guryaha.

Go,aanka in aad sii ijaaro guriga, marka uu dhamaado wakhtiga heshiisku, waxaa lagu goaaminayaa markaa soo dirato dalab cusub iyada la raacayo jf. Dariiqa sharicga § 15.

6. Waktiga laga baxaayo (Oppseiingstid)

Wakhtiga laga baxaayo (Oppseiingstida) waa : ☐ hal bil ☐ sedex bilood
Laga bilbaao 1. Ama 15 bisha marka la keeno qoraalkii laga baxaayay guriga (skriftleg oppseiing).
Wakhtiga loga baxaayo (Oppseiingstida) guryaha kirada waa sedex bilood.

7. Marka lala wareegaayo guriga

Marka la wareejinaayo guriga, waxa kiraystaha laga rabaa (kvittering), markaa waxaa la siinayaa furaha guriga oo ka kooban labo sed.
Kiraystaha waa in u saxeexaa heshiiska, guriga u isticmaalaa sida uu heshiiska yahay iyo si macquul ah. Wixii u baahan in la hagaajiyo waa in uu qof soo gudbiyaa mudo 14 maalmood guduheed. Wixii xun ee soo baxaa waxaa isla eega qaybta Tekniska ee Degmada.waxaa loo baahnay in la bedelo, waxaa loo aqoonsanayaa wax caadiya.

8. Markaa ka guuraysid guriga

Kiraysataha ayaa ka masuul ah in uu guriga ka wada qaado, alaabtiisa gaarka ah, xashiishka iyo waxyaabihii kale. Gurigu waa in uu nadiif ahaadaa maalinta aad ka baxayso. Intaadan ka bixin waxaa guriga soo eegaaya Tekniske si u eegaa in ay jiraan wax kiraytaha masuul ka yahay in uu sameeyo, kiraysataha ayaan bixina wixii uu jabiyay .

9. Kireeyaha (Utleige) xaqa lagu leeyahay

Kiruuye xaqa lagu leeyahy waxaa uu ku jiraa *sharciga heshiisha-guri-ijaarka la sameeyay* 26. march 1999, nr-ka. 17.

10. Kiraysataha (Leigetakeren) xaqa lagu leeyahay

Kirayste xaqa lagu leeyahy waxaa uu ku jiraa *sharciga heshiiska-guri-ijaarka la sameeyay* 26. march 1999, nr-ka. 17.

11. Hagaajinta dibada

Kireysta waxa uu masuul ka yahay in uu hagaajiyo dibada/daarada, barafka uu ka xaadho iyo wadada dadka ka dhaxayso, hadii qofku uu hagaajin waayo dibada (tusaale ahaa daaqa jari waayo, barafka xaadhi waayo, ama uu xashiishka iska hagaajin waayo iwm) degmadu iyada ayaa qabanaysa iyaga u sheegaayo qofka kiraystaha ah, kharash ku baxa kiraystaha ayaana bixinaaya.

12. Sii ijaarid

Kirayste xaq uma laha in uu sii ijaaro guriga ama cid kale u ogaalada in ay isticmaasha guriga.

13. Soo dejin cid kale guriga.

Soo dejin qof kale oo ahayn ninkaaka/xaaska ama qof aad la nooshaya waxay u baahantahay in laguu ogolaado.

Lama ogolo in xayawaan lagu haysto guryaha degmada. Marka la bixinaayo guriga ayaa la eegaa in sharcigaa lagaa daayo taas oo sharuudo lagu xidhaayo.

14. Waxyaabaha gaark ah oo ay wax ku xidhan yihiin (Særskilde vilkår)

☐ ma jirto wax gaar oo lagu xidhaaya

☐ Waxa uu la soconayaa wax gaar taas oo jirta wakhtiga ijaar.

(waxyaabaha gaar u ah qof waxaa lagu qoraa far buubuuran.)

☐ Guriga lagula soconayaa (Xeerka § 6)

Waxyabaha caawimo ugu baahan karaa waa sidan soo socota.
In laga caawiyo dhaqaale maamulka (økonomistyring), lacagta ijaarka la bixiyo, korantada, gadiid guriga keeya, isticmaalka maandooriyaya (rusmiddel), degan/hagaajin (ro(order, xayawaan iwm.

☐ Bixin ijaarkii hore lagu lahaa (dareeqa-xeerka § 9)

Jf. Heshiis bixinta daynta ijaarka ah.

15. Wax kale

- Wixii kale ee aan lagu qeexin heshiiskan waxaa la eegaa sharciga, *sharciga heshiiska-guri-ijaarka la sameeyay* 26. march 1999
- Hadii la jabiyo heshiiskan. Waxaa loo gudbiyaa sharciga *Sharciga in qasab wax lagu meel mariyo, soo baxay* 26.06.92 sharcigaas ayaa qusaaya inta uu jiro
- Kireeyaha iyo kiraystaha waa in ay ogalaadaan in sharciga lagu dhaqo hadii uu yimaado khilaaf.

Saxeexa, kireeyaha iyo kiraystaha waa in ay ogaadaan qodob kasta oo heshiiska ku yaala.
Heshiiska waa labo qaybood oo labada la saxeeya, qayb waliba mid ayay haysanasaa.

Seljord Tariikh: _____

_____ _____

Nr Dhalashada: _____
Kirayste For Seljord kommune

La soo raaciyay: *”Sharciga qaybti guryaha degmada, iyada la eegaa xeerka guryahay-bulshada ee degmada Seljord”*